



Haddii Aad Iskaa U Shaqeysaneysay

Miiska ku jira

Bixinta Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare	1
Dhibcaha Shaqada	2
Soo Saarista dakhliga saafiga ah	2
Habka doorashada	2
Sidee loo soo sheegaa mushaharka	3
Ganacsiga Ay Qoysku Ka Wada Shaqeeyaan	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Dadka intooda badan lacagta Lambarka Bulshada waxaa ka jira cidda ay u shaqeeyaan. Canshuurta waxaa ka jara cidda ay u shaqeeyaan, midda ay ka jiraam mid le'eg ku dara ka dibna u soo dira Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS) lana soo socosdiya mushaharka Lambarka Bulshada. Laakiin dadka iskood u shaqeysta waa in ya oo soo sheegaan dakhliga soo gala oo canshuurta toos u siiyoan IRS.

Haddii aad iskaa u shaqeysto, ganacsi iyo mihnad kalaba, oo kaligaa aad tahay ama aad cid kale kula jirto. waa in aad dakhligaaga soo wargelisaa Lambarka Bulshadamarka aad diiwaan gelineyso canshuurta. Haddii lacagta sanadkii ku soo gasha kharashka ka dib ay tahay \$400 sanadkii, waa in aad dakhligaaga ku sheegtaa Schedule SE oo ay kuu dheer tahay foomamka kale canshuurta.

Bixinta Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare

Xilligan la joogo, adiga iyo goobta shaqadu waxa uu mid walba bixiyaa 6.2 boqolkiiba canshuurta Lambarka Bulshada ilaa \$128,400 dakhliga ku soo gala iyo 1.45 boqolkiiba canshuurta Medicare ee dhamaan dakhliga ku soo gala. Haddii aad iskaa u shaqeysato, waxa aad bixineysaa qeybtaada iyo qeybtii ay goobta shaqadu bixin laheyd oo la isku daray, taasoo ah 12.4 boqolkiiba canshuurta Lambarka Bulshada ilaa \$128,400 iyo 2.9 boqolkiiba ee Medicare ee dhamaan dakhliga ku soo gala. Haddii uu dakhliga ku soo gala ka badan yahay \$200,000 (\$250,000 xaaska si wadajir ah canshuurta u xareysta), waxaa waajib idinku ah in aad bixisaan 0.9 boqolkiiba dheeraad ah canshuurta Medicare.

Waxaa jira laba canshuur oo dadka laga jaro oo hoos u dhacay sanadkan.

Ugu horeyn, dakhliga kaa soo gala iskaa inaad u shaqeysato waxaa la yareeyey kala bar cabshuurta Lambarka Bulshada. Sidoo kale ayaa loo shaqeeyaha loola dhaqmaa xaga sharciyada cashuurta, waayo qeybta loo shaqeeyaha ee canshuurta Lambarka Bulshada looma tixgeliyo mushahar shaqaalaha la siiyey.

Midda labaad, waxa aad iska jari kartaa kala bar canshuurta Lambarka Bulshada ee Form 1040 ee IRS. Laakiin waa in aad ka jartaa dakhliga kharashka ka dib si aad u agaato dakhliga lagaa doonayo in aad canshuur ka bixiso. Ma mid shay shay loo xisaabi karo mana aha in lagu qoro Schedule C.

Haddii dakhli kaa soo galo mushahar iskaana aad u shaqeysato, canshuurta mushaharka ayaa marka hore la bixinayaa. Laakiin sharcigan waxa uu muhim yahay oo kaliya haddii dakhliga ku soo gala ka badan yahay \$128,400.

Tusaale ahaan, haddii mushaharkaagu yahay \$30,000 shaqaada aad iskaa u shaqeysatana kaa soo galo \$40,000 sanadkii 2018, waxa aad bixineysaa canshuurta Lambarka Bulshada ee mushaharka iyo dakhliga kaa soo galay shaqada aad iskaa u shaqeysato. Hase yeeshee, sanadka 2018 ka, haddii mushaharkaagu yahay \$87,700 dakhliga shaqada aad iskaa u shaqeysatana yahay \$40,900, ma bixineysida canshuurla Lambarka Bulshada laba jeer dakhliga ka badan \$128,400. Goobta shaqada waxaa lagaaga goynayaa 7.65 boqolkiiba oo ah canshuurta Lambarka Bulshada iyo Medicare mushaharkaaga oo \$87,700. Waa in aad ka bixisaa 15.3 boqolkiiba ee canshuurta Lambarka Bulshada iyo Medicare ee ugu horeeya ee dakhliga kaa soo gala shaqada ee \$40,700 ee aad iskaa u shaqeysato iyo 2.9 bolkiiba oo ah canshuurta Medicare \$200 ee soo harta.

Dhibcaha Shaqada

Waxa aad u baahan tahay in aad shaqeysay oo aad bixisay canshuurta Lambarka Bulshada muddo dheer si aad u hesho macaashka Lambarka Bulshada. Inta lagaa doonayo in aad

shaqeyso waxa ay ku xiran tahay xilliga aad dhalatay, laakiin ma jirto cid laga doonayo wax ka badan tocan sano (40 dhibcood).

Sanadka 2018, haddii dakhliga ku soo gala uu yahay \$5,280, waxa aad heysataa dhibcaha ugu badan ee lagaa doonayo — halkii dhibic waxa ay u dhigantaa \$1,320 dakhliga ku soo gala sanadka oo dhan. haddii dakhligaagu ka yar yahay \$5,280 wali waxa aad isticmaali kartaa habka doorashada ee lagu faahfaahin doono dhamaadka warqaddan.

Lacagta ay kaa hayaan Lambarka Bulshada ayaan u adeegsanaa si aan u ogaano macaashka Lambarka Bulshada, sidaa darteed waa in aad soosheegtaa dakhliga ugu badan eeku soo gala, sida uu sharcigu waajib kaaga dhigayo.

Soo Saarista dakhliga saafiga ah

Dakhliga saafiga ah dhinaca Lambarka Bulshada waa kan adiga ku ah dakhliga guud ee kaa soo gala ganacsiga oo laga jaray kharashka ganacsiga ku baxa iyo qiimo dhaca.

Dakhliga qarkiis lama xisaabaan Lambarka Bulshada mana aha in lagu daro dakhliga ku soo gala waxaana ka mid ah:

- Qeyb faa'iido ah oo kaa soo gasha warqadaha la kala iibsado ama dulsaar, haddii aadan ahayn dulaal.
- Dulaarka kaa soo gala deynta, ilaa ay shaqadaadu tahay deyn bixinta.
- Kirada mulkiilayaasha guryaha, haddii aadan ahayn qofka guryaha kala gada ama adeeg u fidiya dadka degan guryaha; ama
- Aanu dakhli kaa soo gelin wadaag xadidan oo aad wax ku leedahay.

Habka doorashada

Haddii dakhliga ku soo gala ka yar yahay \$400, weli waa mid la xisaabay Lambarka Bulshadahabka doorshada ee soo sheegista dakhliga. Waxa aad dooran kartaa nidaamka aan khasabka ahayn dakhliga kaa soo gala beeraha, aan kaa soo galin beeraha ama

labadooda oo la isku daray. Shan jeer oo kaliya ayaad isticmaali kartaa ndiaamka doorashada noloshada oo dhan. Xad u go'an ma jiro dakhliga kaa soo gala beeraha haddii aad doorato nidaamka aan khasabka aheyn. Sidan weeye sida ay u shaqeysa:

- Haddii dakhliga guud ee kaa soo gala beeraha uusan ka badneyn \$7,800 ama dakhliga oo laga jaray kharashka (faa'iidada kuu soo harta) ay ka yar tahay \$5,631, waxa aad soo sheegi kartaa hadba ka yar marka laga dhigo laba dalool oo dalool (2/3) ee dakhliga guud ee beeraha kaa soo gala (oo aan ka yareyn 0) ama \$5,280; ama
- Haddii kaa soo gala wixii ka baxsan beeraha uu ka yar yahay \$5,631 ama sidoo kal yar yahay 72.189% ee guud ahaan dakhliga aan beeraha kaa soo galin, iyo haddii dakhliga saafiga ah ee kaa soo gala shaqada aad u madax banaan tahay ay ka yar tahay \$400 muddo 2 sano oo muddo sadex sano ah.
- Waxa aad isticmaali kartaa habka dakhliga beeraha kaa soo galin iyo kan aan soo galin labada, adiga oo soo sheegay dakhli ka yar kan dhan ahaan kaa soo gala beeraha iyo kan aan beeraha aheyn ee shaqada aad iskaa u shaqeysato. Haddii aad isticmaasho labada hab si aad u ogaato dakhliga ku soo gala, ma soo sheegi kartid wax ka badan \$5,280.

Firo gaar ah: Haddii aad tahay beeraley, waxa aad adeegsan kartaa habka doorashada ee soo sheegista sanad kasta. Haddii dakhliga dhabta ah ee ku soo gala uu yahay ugu yaraan \$400 sanadka soo socda muhim ma aha. Sidoo kale, faa'iidada guud ee baaraha, dakhliga saafiga ah iyo faa'iidada aan beeraha kaa soo galin waa mid isbedeleysa.

Daabacaadda IRS ee 334, *Tax Guide for Small Business (Talo Siinta Ganacsatada)* Yaryar, ee IRS Schedule SE adiga oo horudhaca ka helaya macluumaad dheeraad ah oo leh faa'iido badan. Waxa aad ka heli kartaa www.irs.gov ama soo wac **1-800-829-4933**.

Sidee loo soo sheegaa mushaharka

Foomamka so socda waa in aad buuxisaa inta ka horeysa 15ka Abriil. ka dib sanad kasta oo dakhliga saafiga ah ee ku soo gala uu yahay \$400 ama ka badan.

- Form 1040 (U.S. Individual Income Tax Return); (Canshuur xareynta)
- Schedule C (Profit or Loss from Business) or Schedule F (Profit or Loss from Farming) ee khasaaraha iyo faa'iidada hadba kan ku haboon; iyo
- Schedule SE (Self-Employment Tax). (Dadka iskood u shaqeysta)

Foomamkan waxa aad ka heli kartaa bogga internetka ee IRS www.irs.gov. U soo dir foomamka xareynta canshuurta iyo kuwa shaqada aad iskaa u shaqeysato IRS.

Xitaa haddii aan lagu laheyn canshuur, waa in aad buuxisaa Form 1040 iyo foomka dadka iskood u shaqeysta ee Schedule SE. Tani waa sidaas xitaa haddii aad qaadaneysa macaashka Lambarka Bulshada.

Ganacsiga Ay Qoysku Ka Wada Shaqeeyaan

Waxaa laga yaabaa in qosyku si wadajir ah ganacsi uga wada shaqeeyo. Waxaa laga yaabaa in laba qof oo is qaba ay wadaag yihiin ama ay isku darsadeen ganacsi. Haddii aad ganacsi wada leedihiin, waa qof walbaa sheegaa faa'iidada safiga ah ee uu ka helo ganacsiga kuna sheegaa foom u gaar ah oo dadka iskood u shaqeysta ah (Fooma Schedule SE), xitaa haddii aad canshuurta si wadajir ah u xareyneysaan. dadka ganacsiga wadaaga waa in ay isla gartaan dakhliga saafiga ah ee mid walba sheegayo (tusaale ahaan 50 boqolkiiba iyo konton boqolkiiba). Sidoo kale xaaska is qaba oo ninka iyo naagtu ka wada qeyb qaateen lahaashaha ganacsiga oo canshuurtana si wadajir ah u xareystay waxa ay dooran karaan in canshuurta looga qaado hal abuur wadaag (joint venture) halkii aad noqon laheyd mulkiyad

wadaag (partnership) Mid walba waa inuu goonidiisa u diiwaan geliyaa Schedule C ama C-EZ.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqaysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10022-SO | January 2018
Haddii Aad Iskaa U Shaqaysaneysay
If You Are Self-Employed (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha